# COVID-19: XAQIIQOOYINKA IYO TIROOYINKA URURKA BISHA CAS (SRCS) 2020 JAWAAB-CELIN

Si looga hortago faafitaanka COVID-19 ee dalka, Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS)ayaa waxay bulshooyinka caawinaysay iyada oo loo marayo dhiirrigelinta caafimaadka, dhiirrigelinta fayo-dhowrka iyo ololayaasha wacyi-gelinta ah. Goobaha bartilmaameedka ugu muhiimsan ee Ururka Bisha Cas waxay yihiin xarumaha Daryeelka Caafimaadka Asaasiga ee SRCS, bulshooyinka ku nool meelaha xarumaha SRCS u jirta 5km, isbitaallada, degaannada barakacayaasha iyo degaannada kale ee khatarta badan leh.

## DHIIRIGELINTA CAAFIMAADKA



- **124,877** qof ayaa **71** xarumo caafimaad ee Ururka Bisha Cas(SRCS)lagu caawiyay waxbarasho caafimaad iyadoo loo maraayo kor u qaadida dhaqamada gacmo dhaqashada iyo kala fogaanshaha bulshada
- **1000** xabbo oo ah qalabka Macluumaadka, Waxbarashada iyo Warbaahinta (IEC) ayaa la qaybiyey lana caawiyay **7,953** oo qof.
- **12** ka mid ah shaqaalaha Ururka Bisha Cas oo ku kala sugan laamaha Garoowe, Bosaso iyo Gaalkacyo ayaa lagu tababarey maareynta kiiska(xaaladda) Covid-19.
- Marooyinka sanka iyo afka lagu xirto, gacangashiyo iyo tas-hiilaadka gacmo dhaqashada ayaa la siiyay dhammaan hawl-wadeennada caafimaadka ee ku sugan isbitaalka Keysaney.
- **20** mutadawiciin oo u heellan in ay heerkulka ka qaadaan dhammaan dadka booqanaya isbitaalka Keysaney ayaa la geeyay isbitaalkaas
- Xarunta isbitaalka Keysaney ayaa waxaa lagu buufiyay Koloriin.
- Goobaha gacma-dhaqashada oo ay isticmaali karaan bulshooyinka ayaa laga sameeyay dhammaan xarumaha caafimaadka, xarumaha dhaqan-celinta naadafada, xeryaha barakacayaasha, halkaas oo kooxaha wicitaanka telefoonka ee Dib-u-soo Celinta Xiriirka Qoyska (RFL) ee Ururka Bisha Cas ay ka shaqeeyaan, isbitaalka iyo xafiiska isku-dubbaridka.
- Qalabka Badbaadada Shakhsiga (PPE) aasaasiga ah ayaa waxaa la siiyay dhammaan shaqaalaha ku sugan xarumaha Ururka Bisha Cas iyo mutadawiciinta ku lug leh howlaha. Waxyaabaha la isticmaalay waxaa ka mid ah marooyinka afka iyo sanka lagu xirto, gacangashiyo iyo saabuun.
- Xaraare cabbireyaal ayaa la gaarsiiyay dhammaan xarumaha caafimaadka si loogu ogaado heerkulka bukaannada booqda xarumaha caafimaadka ee SRCS.
- Shaqaalaha SRCS iyo mutadawiciinta ayaa loo tababarey waxbarasho caafimaad oo saamayneysa dad tiro badan si loogu qabto xarumaha caafimaadka, suuqyada oo ay ku jiraan bulshooyinka iyo barakacayaasha.
- **165** mutadawiciin tababbaran ayaa loo abaabulay inay guri ilaa guri u fuliyaan farriimaha ka hortagga COVID-19 una gaarsiyaan qiyaastii **83,160** shakhsi oo ku nool Hargeysa

## DHIIRIGELINTA FAYO-DHOWRKA



- **1,410** xabbo oo saabuun ah, **30** haamanka biyaha, **245** jeeri gaan, **51** weelasha qashinka lagu rido, **40** xabbo oo nadiifiyeyaal, dhalooyin iyo baakado istiraasho ah ayaa loo qaybiyey laamaha SRCS iyo xarumaha caafimaadka.
- Kulamada Dhiirrigelinta fayo-dhowrka ee heer bulsho iyo heer xarun caafimaad ahaan ayaa la qabtay. Farriimaha muhiimka ee ka hortagga ah iyo gacmo-dhaqashada saxda ah ayaa loo sharaxay **60,884** qof oo dadka degaanka ah iyo barakacayaasha labadaba, dadka jooga suuqyada, tuulooyinka iyo barta sugitaanka xarunta caafimaadka.
- Haamanka gacmo-dhaqashada iyo saabuun ayaa waxaa loo qaybiyey dhammaan **71**-ka xarumo caafimaad oo ay taageerto Ururka Bisha Cas. **3,971** qof ayaa ka faa'ideystay dhiirigelinta caafimaadka bulshooyinka ee dhismayaasha Ururka Bisha Cas

## KA HORTAGGA CAABUQA IYO XAKAMEYNTA EE XARUMAHA CAAFIMAADKA



- **57,122** qof ayaa heley Qalabka Badbaadada Shakhsiga(PPE) waxaana dhammaan xarumaha caafimaadka ee Ururka Bisha Cas lagu qalabeyay marada afka iyo sanka lagu xirto iyo qalabka gacmo dhaqashada oo la socda jeermis dile. Heerkulka bukaannada booqda xarumaha caafimaadka Ururka Bisha Cas waa la hubiyaa ka hor inta aysan ku biirin kuwa kale oo ku sugan brta sugitaanka
- Xarun caafimaad kasta waxay leedahay tiro mutadawiciin ah oo isticmaaleyaasha adeegga si joogto ah u siiya oona bara tallaabooyinka looga hortagayo caabuqa.
- **27** shaqaalaha Ururka Bisha Cas ayaa loo tababaray ka hortagga iyo xakamaynta caabuqa waxaana loo xilsaaray in ay ku dabaqaan aqoontaan iyo xirfadan qalabka xarumaha caafimaadka ee Hargaysa.

## KOR U QAADIDA WACYIGA BULSHADA DHEXDEEDA IYADA OO LOO MARAAYO QALABKA MACLUUMAADKA, WAXBARASHADA IYO WARBAAHINTA, TELEFISHANNADA IYO IDAACADAHA



- Farriimaha telefishannada iyo raadiyaha ayaa waxaa lagu baahiyaa idaacadaha FM-ka ee maxalliga ah kuwaas oo baahiya farriimo muhiim ah oo ku saabsan gacmo-dhaqashada, fayo-dhowrka iyo kala fogaanshaha bulshada. Farriin baahintu waxay dabooleysaa gobollada Banaadir, Shabeellaha Hoose, Shabeellaha Dhexe, Hiiraan, Nugaal iyo Gedo, iyo degmooyinka Jowhar iyo Baydhabo
- In ka badan **80,400** oo qof ayaa ka faa'iday kulamada wacyigelinta ee COVID-19 iyo qaybinta bostero iyo waraaqo ka hadlaya isla arrinta.

## DHISIDDA AWOODDA



- **13,393** oo mutadawiciin ah, shaqaalaha xarumaha caafimaadka iyo Guddiyada Caafimaadka Bulshada (CHC) ayaa lagu tababarey COVID 19 iyo tallaabooyinka looga hortago, waxayna hadda ku lug leeyihiin kor u qaadida wacyiga.